



Somalia Non-State Actors

Location Office Address: **Talex Road, Hodan District Mogadishu, Somalia**

Tell: **+252616310814**. Email: communicationofficer@soscensa.org. Website: www.sonsaplatform.com

Warbixinta Billaha ee December 2019

Hordhac

Dallada Bulshada Rayidka ee (SONSA) ayaa qabatay hawlo badan iyadoo sidoo kale ka qeybgashay kulamo wadatashi ah oo muhiim u ah bulshada rayidka.

Hawlaha Bisha Disembar

- **Hawsha1**



Muqdisho 1 Disember 2019; Wafdi ka socday Dallada Bulshada Rayidka ee SONSA ee uu hogaaminayay gudoomiyaha dallada ayaa kulan ka qaatay xubno kamida baarlamaanka Yurub oo booqasho dalka ku yimid, waxaana looga warbixiyay xaalada uu wadanka ku suganyahay haddii ay tahay dhanka arrimaha bulshada, dhaqaalahaiyo horumarka siyaasadeed ee la sameeyay.

- **Hawsha2**



Muqdisho 7 Disembar 2019; Dallada Bulshada Rayidka ee SONSA ayaa ka qaybgashay madasha sadexaad ee siyaasada dhaqaalaha qaran oo uu ciwaankedu ahaa muhiimada dib u habeynta xasiloonda waarta ee dhaqaalaha, waxaa kasoo qeybgalay wufuud ka kala socotay Qaramada Midoobay, midwoga Yurub, madax ka socotay dawlada feralka Soomaaliya iyo ururada bulshada rayidka Soomaaliyee.

• Hawsha3



Muqdisho Disembar 2019; Dallada Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA ayaa ka qeybgashay kulamo tixane ahaa oo looga wadahalay nidaamka siyaasada Soomaaliya, hindise sharciyeed ay doorashooyinka qaran ee ay soo gudbiyeen guddiga kumeelgaarka ee baarlamaanka Soomaaliya iyo sharciga doorasho eek u haboon ku dalka, madasha waxaa soo qabanqaabiyay hay'ada Conflict Dynamics International iyo machadka Rifty Valley, waxaana kasoo qeybgalay bulshada rayidka, xubno katirsan baarlamaanka, guddiga madaxa banana

ee doorashooyinka qaranka, guddiga xuduudaha iyo federalka iyo khabiiro kale.

• Hawsha4



Muqdishu 09 December 2019; Dallada Bulshada Rayidka ee SONSA ayaa ka qeybgashay aqoon isweydaarsi ku saabsan awood dhisida bulshada rayidka eek u aadan u qareemida horumarinta dibu habeynta dhinaca amniga, aqoon isweydaarsigan ayaa lagu kobcinayay ama lagu dhiirigelinayay sida bulshada rayidka ay kaalinteeda uga qaadato horumarinta dhinaca amniga.

• Hawsha5



Muqdisho 11 December 2019; Dallada bulshada rayidka Soomaaliyeed ee SONSA waxa ay ka qeybgashay kulan lagu kor loogu qaaayo ka qeybgalka arrimaha bulshada iyo siyaasada ee dadka naafada ah. Wakiillo ka socday wasaarada haweenka iyo xuquuqul insaanka, runta ganacsiga soomaaliyeed iyo qeybaha kala duwan ee ururada bulshada rayidka ayaa kasoo qeybgalay. Waxaana soo qabanqaabiyay hay'ada Iftin Foundation.

• Hawsha6



Muqdishu December 2019; Dallada Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA oo ay wehlinayaa hay'daha Conflict Dynamics International iyo Rift Valley institute ayaa so qabanqaabiyay sadex maalin oo kulan wadatashi ah oo ay bulshada rayidka kaga tashanayeen hanaanka doorashooyinka dalka iyo xiliga kala guurka siyaasada, qeybaha kala duwan ee ururada bulshada rayidka ayaa kasoo qeybagalay odayaasha dhaqanka, culumaa'udiinka, dhalinyarada, haweenka iy aqoonyahanno.

• Hawsha7



Muqadisho 16 December 2019; wakiilo lo ka socda Dallada Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA ayaa ka qeybgalay kuln dhageysi dadweyne oo looga hadlaya bajadka dawlada federalka ee sannadka 2020, aqoonyahano, haween, dhalinyaro iyo qeybaha kale bulshada rayidka ayaa kaso qeybagalay.

• Hawsha8



Garowe 19 December 2019; xubno ka socday Dallada Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA ayaa ka qeybagalay kulan ka dhacay magaalada Garowe ee caasimaa gobolka Nugaal oo looga hadlayay arrimaha garsoorka iyo baahinta cadaalada guud ahaan Soomaaliya waxaana kulanka soo agaasimay xafiiska xeer ilaaliya qaran Soomaaliyeed.

- **Hawsha9**



Muqadisho 21 December 2019; Dallada Bulshada Rayidka Soomaaliyeed SONSA oo ay wehlinayaan hay'ada Center for Humanitrian Dialogue ayaa soo agaasimay kulanka waxtashiga bulshada rayidka Soomaaliyeed iyo guddiga wadaxaajoodka iyo dhab u heshiisiinta ee Soomaaliya iyo Soomaaliland odayaasha dhaqanka, culumaa'udiinka, haweenka iyo aqoonyahanada ayaa kasoo qeybagalay.

- **Hawsha10**



Mogadishu 21 December 2019; Dallada Bulshada Rayidka Soomaaliye ee SONSA oo matasha qeybaha kala duwan ee ururada bulshada Soomaaliyeed ayaa war saxaafadeed soo saaratay ay ku taageereyso war kasoo baxay beesha caalamka oo ku baaqday in Soomaaliya loo diyaariyo doorasho qof iyo cod ah oo waqtigeeda ku dhacda.

- **Hawsha11**



Muqadisho 24 December 2019; Xubno ka tirsan Dallada Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ee SONSA ayaa ka qeybagalay kulan ka dhacay Muqdisho oo ahaa mahadcelinta dadkii ka qeybqaatay gurmadii ballaarnaa ee laga geestay fatahaadii ku dhufatay magaalada Beledweyne ee gobolka Hiiraan.

• Hawsha12



Muqadisho 26 December 2019; Wakiillo ka socday Dallada Bulshada Rayidka ee SONSA ayaa ka qeybagalay kulan dhageysi bulsho oo lagu qabtay magaalada Muqdisho kulanka waxaa looga wadahalnay hindise sharciyeeda batroolka waxaana soo qabanqaabiyay guddiga qeyraadka dabiiciga ee aqalka sare baarlamaanka dawlada Soomaaliya.

• Hawsha13



Muqdishu 29 December 2019; Xubno ka tirsan Dallada Bulshada Rayidka Soomaaliyeed ayaa ka qeybagalay kulan aqoon isweydaarsi ah oo laba maalin ka socday magaalada Muqdisho kulanka waxaa lagu bartay Ahdafta Horumarka Waara (SDGs) waxaa soo qabanqaabiyay hay'ada SaferWorld waxaana martigelisay SWDC.